

## **Shahaado koroone – soojeedin wax looga beddelayo xeerka ka-hortagga cudurrada**

**Dawladdu waxay Stortinget – Golaha Shacbiga Norway u gudbinaysaa soojeedin ku-meelgaar ah oo wax looga beddelayo xeerka ka-hortagga cudurrada taas oo ku saabsan shahaadada koroonaha. Ujeeddada qodobbada cusub ayaa ah in la helo nidaam si la hubo loogu xaqiijiyo caddaymaha xaaladda tallaalka, in qofku difaacan yahay kaddib markii uu cudurka koroonuhu ku dhacay iyo natiijada tijaabada.**

Waxaa kale oo ay soojeedintu u gogol xaaraysaa dhaqangelinta go'aanka Midowga Yurub ee soo socda. Waxay sidoo kale, markii loo baahdo, Wasaaradda caafimaadka- iyo daryeelka sharciyan awood u siin doonta isu duwidda isticmaalka shahaadada koroonaha.

– Sida ay Agaasinka caafimaadka iyo Machadka caafimaadka dadweynuhu ku taliyeen ba waxaa shahaadada koroonaha hor iyo horraan ba dalka gudihisa loo isticmaali doonaa qabanqaabooyinka guud, safarrada maraakiibta dalxiiska (cruise) iyo safarrada abaabulan ee shirkad laga iibsaday gaadiid iyo jiif wada socda (pakketurer). Waxaan sidoo kale ka fikiraynaa in shahaadada loo isticmaali karo meelo kale iyo degmooyinka ay ka jiraan tillaabooyin ka adag kuwa heer qaran, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Waxay dawladdu laamaha ay khusayso ka codsatay in ay qiimeeyaan in meelaha qaarkood laga billaabi karo isticmaalka shahaadada koroonaha ka hor intaan la gaarin heerka 3-aad ee dib-u-furista bulshada, waxaanan ka codsannay in ay eegaan in ay deegaannada gaarka ah shahaadada isticmaali karaan.

### **Dib-u-furis degdeg ah**

– Dawladdu waxay qabtaa in ay shahaadada koroonuhu suuragelin karto in bulshada dib loogu furo si tartiib ah oo xakamaysan. Taas oo soo dedejin karta dib-u-furista guud ee dalka, ayuu yiri Høie.

Isticmaalka shahaadada koroonaha waa la joojinayaa marka heerka faafidda cudurka iyo tallaalistu oggolaadaan in aan xayiraadahaan loo baahnayn. Xeerarka Midowga Yurub laftigooda ayaa ahaanaya kuwo ku eg wakhti xaddidan. Dal kasta xor ayuu u yahay sida shahaadada looga isticmaalayo gudaha dalka.

– Shahaadadii koroonaha ee koowaad ee norwiijiga waxay haddaba ku jirtaa bogga helsenorge.no. Shahaadadu waxay tusaysaa natiijada tijaabada iyo in koroonaha lagaa tallaalay. Waxaa hadda laga shaqaynayaa sidii looga dhigi lahaa shahaado koroone oo waafaqsan xeerarka Midowga Yurub. Shahaadada koroonuhu waa in ay ahaataa mid ka shaqaynaysa dalka gudihisa iyo dibedda labadaba, ayuu yiri Høie.

### **Dhegeysi guud**

5-tii bishii maajo ee 2021 ayay Wasaaradda caafimaadka- iyo daryeelku dhegeysi guud u dirtay soojeedin cusub oo ku-meelgaar ah oo lagu darayo cutubka 4A ee xeerka ka-hortagga cudurrada. Waxaa wasaaradda soo gaaray isu geyn 10 572 talo oo dhegeysiga fikrad looga

dhiibanayo. Dhammaantood waa la akhriyay, fikradihii la soo gudbiyay na waa lagu daray qiimaynta wasaaradda.

Dood badan ayay abuurtay shahaadada koroonuhu, hay'adihii fikradda ka dhiibtayna iskuma raacsana in shahaadada noocan ah la sameeyo. Meesha ay qaar soo dhoweeyeen shahaadada ayaga oo u arka in ay muhiim u tahay sidii si sax ah oo caddaalad loogu gaari lahaa dib-u-furista bulshada ee lagama maarmaanka ah, ayay qaar kale shahaada u arkaan in ay lid ku tahay bulshada norwiiijiga. Hay'adaha dawladda iyo ururrada waaweyn badankoodu way soo dhoweeyeen soojeedinta. Qaar ka mid ah sharciyaqaannada jaamacadaha ayaa aaminsan in aysan shahaadadu buuxinayn shuruudaha sharciga. Qiyaastii 10 500 shakhsiyaad gaar ah ayaa dhegeysiga fikraddooda ka dhiibtay. Kuwaas badankoodu way ka soo horjeedaan nidaamka shahaadada koroonaha.

Halkan ka akhriso dhegeysiga:

[Dhegeysiga guud ee shahaadada koroonaha – wax-ka-beddello lagu samaynayo xeerka ka-hortagga cudurrada - regjeringen.no](https://www.regjeringen.no/en/press/press-releases/2020/04/dhegeysiga-guud-ee-shahaadada-koroonaha-wax-ka-beddello-lagu-samaynayo-xeerka-ka-hortagga-cudurrada-_-regjeringen.no)